IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

Sannadka 15aad Muqdisho, 1da Agoosto 1987 Lambar 8

## JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay waxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortiisanku F R. [illegible] [illegible] iyo waxii ka yar waa 2 labs Sh. Rukunka iyo [illegible] waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Carshkaroosha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI


SHARCI L. 13 ee 17 Luulyo 1987, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo J/dda Jabuuti, kuna saabsan «Dalxiiska. Bog; 671

SHARCI L. 14 ee 17 Luulyo 1987, Oggolaansho Heshiis Guud ee Gaadiidka oo dhexmaray JDS iyo J/dda Jabuuti. » 672

SHARCI L. 5 ee 17 Luulyo 1987, Oggolaansha Heshiis Ganacsi dhexmaray J.D.S. iyo J/lda Jabuuti. » 673

SHARCI L. 16 ee 17 Luulyo 1987, Oggolaansho Heshiis Gaadiidka Dhulka ee dhexmaray JDS iyo J/dda Jabuuti. » 674

SHARCI L. 17 ee 22 Luulyo 1987, Wax ka bedde lid Dastuurka J.D.S. » 675


Wakaaladda Madbacadda Qaranka

CHARCI L. 18 ee 22 Luulyo 1987, Oggolaansho Xisaabxirka Miisaaniyadda 1986. » 676

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 29 ee 17 Luulyo 1987, Meelmarin Heshiiska Dalxiiska ee dhexmaray J.D.S. iyo J/dda Jabuuti. » 677

XEER MADAXWEYNAHA DJS, L. 30 ee 17 Luulyo 1987, Meelmarin Heshiis Guud oo dhexmaray J.D.S. iyo J/dda Jabuuti. » 678

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 31 ee 17 Luulyo 1987, Meelmarin Heshiiska Ganacsiga ee dhexmaray JDS iyo J/dda Jabuuti. » 679

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 32 ee 17 Luulyo 1987, Meelmarin Heshiiska Gaadiidka Dhulka, dhexmaray JDS iyo J/dda Jabuuti. » 680

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 33 ee 21 Luulyo 1987, Gunno Maaliyeed Shaqaalaha Madaxtooyada JDS. » 681

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 11 ee 27 Abr. 1987, Aqoonsi Ururka Samafalka, Horn of Africa Relief and Development Foundation. » 685

QAYBTA SADDEGAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 3.2.87, Naado Dhul J/le Xaaji Saciid Diiriye L. 199/bis » 685/[illegible]

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 18.7.87, Lumid Jeeg War. L. 0048434 ku qoran Caasha Jaamac Cigaal L. 220 » 686

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 18.7.87, Lumid Jeeg War. L. 00488838 ku qoran Caasha Jaamac Cigaal L. 221 » 687

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.7.87, Lumid Buug Kayd L. 2878 ku qoran Maymuuna Xersi Warsame L. 222 » 688

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 11.7.87, Lumid Jeeg War. L. 0461529 ku qoran Iskow Cabdullaahi Maxamed L. 223 » 689

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.7.87, Lumid Buug Kayd L. 9930 ku qoran Faaduma Xuseen Faarax L. 224 » 690

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.7.87, Lumid Jeeg War. L. 0060104 ku qoran Xuseen Faa rax Samatar L. 225 » 691

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.7.87, Lumid Jeeg War. L. 0779299 ku qoran Cabdulqaadir Macalim C/raxmaan L. 226 » 692

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.7.87, Lumid Jeeg War. L. 0344074 ku qoran Cabdiraxmaan Khaliif Ciise L. 227 » 693

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.7.87, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran, Maryan Maxamed Muunya L. 228 » 69

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 29.6.87, Lumid Jeeg War. L. 0449678 ku qoran Ismaaciil Cabdi Maygaag L. 229 » 695

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 22.7.87, Lumid 2 Jeeg War. L. 0340405-0342229, ku qoran Xasan Axmed Jaamac L. 230 » 696

MAXKAMADDA G.W.GALBEED, 9.7.87, Lumid Jeeg L. 0012281 ku qoran Cali Jaamac Warsame L. 231 » 697

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

**SHARCI LAMBAR 13, taariikh 17.7.1987:**
Oggolaansho Heshiis dhexmaray Jamhuuriyad-da Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyad-da Jabuuti, kuna saabsan «DALXIISKA»

**MADAXWEYNAHA J.D.S,**

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaashaha Golaha Shacbiga;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

SHARCIGA SOO SOCDA:

**QODOBKA 1AAD**

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti, kuna saabsan Horumarinta DALXIISKA laba Dal.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Muqdisho markey taariikhdu ahayd 9ka Jannaayo 1987.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

**QODOBKA 2AAD**

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku qoran Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhaariyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo qodobbada Heshiiska.

**QODOBKA 3AAD**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiskan.

**QODOBKA 4AAD**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.7.1987

**MADAXWEYNAHA J. D. S.**

SHARCI LAMBAR 14, Taariikh 17.7.1987:
Oggolaasho Heshiis guud ee Gaadiidka oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti

## MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaashaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

### QODOBKA 1AAD

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti kuna saabsan Heshiis guud Gaadiidka labada Dal.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho markey taariikhdu ahayd 9ka Jennaayo 1987.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

### QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Heshiiska ku qoran Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo He- Soomaaliya iyo qodobada Heshiiska.

### QODOBKA 3AAD

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo heshiiskan.

### QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.7.1987

MADAXWEYNAHA J. D. S.
Maxamad Siyaad Barre)

SHARCI LAMBAR 15, taariikh17.7.1987:
Oggolaasho Heshiis ganacsi dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti

MADAXWEYNAHA J,D,S,

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaashaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

QODOBKA 1AAD

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti oo saameeya ganacsiga labada Dal.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho taariikhdu markey ahayd 9ka Jannaayo 1987.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Qodobbada Heshiiskan.

QODOBKA 3AAD

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiskan.

QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.7.1987

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamad Siyaad Barre)

SHARCI LAMBAR 16, taariikh 17.7.1987
Oggolaasho Heshiiska Gaadiiidka Dhulka ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti

MADAXWEYNAHA J.D.S,

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaashaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti, kuna saabsan gaadiidka dhulka labada Dal.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho markey taariikhdu ahayd 9ka Jannaayo 1987.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Heshiiska ku qoran Qod. 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Qodobbada Heshiiska.

QODOBKA 3AAD

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiskan.

QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta, Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.7.1987

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamad Siyaad Barre)

SHARCI LAMBAR 17, taariikh
Wax ka beddelid Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAADA oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGAN SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

Qodobka 86aad ee Dastuurka iyo beddelaaddii ka dambeysay oo lagu guddonsaday Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, waxaa lagu kordhiyey faqrad 5aad oo u qormeysa sida soo socota:

5. MADAXWEYNUHU WUXUU MAGACAABI KARAA WASIIRKA KOOWAAD EE GOLAHA WASIIRRADA IYO KU XIGEENNADA WASIIRKA KOOWAAD WAXAA LAGU CADDEYNAYAA SHARCI GAAR AH.»

QODOBKA 2AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 22 Juun 1987

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamad Siyaad Barre)

SHARCI LAMBAR 18, Taariikh 22 Luulyo 1987
Oggolaanshaha xisaabxirka miisaaniyadda 1986

**MADAXWEYNAHA JDS**

ISAGOO TIXGELINAAYA oggolaashaha Golaha Shacbiga;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

**QODOBKA 1AAD**

Waxaa la oggolaaday Xisaabxirka Miisaaniyadda 1986 oo ah sida ku tifaftiran Lifaaqa Sharcigan.

**QODOBKA 2AAD**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 22 .7. 1987

**MADAXWEYNAHA J. D. S.**
(Maxamad Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS LAMBAR 29
Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriy-
ad Jabuuti.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lacbar 13 ee 17ka Luulyo 1987 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska ku tilmaaman Xeerkan;

MARKUU TIXGELIYEY in ay lagama maarmaan tahay in la meelmariyo Heshiiskan;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

Waxaa la meelmariyey Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti oo lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho taariikhdu markey ahayd 9ka Jannaayo 1987, kuna saabsan Horumarinta Dalxiiska Labada Dal.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyad Dimoqraadiga Soomaaliya awood sharci ah.

QODOBKA 3AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17. 7. 1987

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(Maxamad Siyaad Barre)

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS LAMBAR 30
ee 17ka Luulyo 1987:
Meelmarinta Heshiis guud oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti oo ku saabsan gaadiidka Labada Dal.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5, iyo Qod. 82 faqradda 4, ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 17ka Luulyo 1987 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaamaan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA
XEERKA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

Waxaa la meelmariyey Heshiiska Guud ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti oo lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho taariikhdu markey ahayd 9ka Jannaayo 1987, kuna saabsan Gaadiidka Labada Dal.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya awood sharci ah.

QODOBKA 3AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17. 7. 1987

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(Maxamad Siyaad Barre)

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS lambar 31
17ka Luulyo 1987;
Meelmarinta Heshiiska ganacsi ee dhex-
maray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY Faqradda 4aad ee Qod. 82aad iyo faqradda 5aad, Qod. 87aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 15 ee 17ka Luulyo 1987 ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

Waxaa la meelmariyey Heshiiska ganacsi ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti oo lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho taariikhdu markey ahayd 9ka Janaayo 1987.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya awood sharci ah.

QODOBKA 3AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.7.1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamad Siyaad Barre)

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS Lambar 32 ee 17ka Luulyo 1987;
Meelmarinta Heshiiska Gaadiidka Dhulka dhex maray JDS iyo Jamhuuriyadda Jabuuti.

MADAXWEYNAHA J,D,S,

MARKUU ARKAY:Qod. 67, farqadda 5 iyo Qod. 82, farqadda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;
MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 16 ee 17ka Luulyo 1987 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska ku tilmaaman Xeerkan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA
XEERKA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

Waxaa la meelmariyey Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Jabuuti oo lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho taariikhdu markey ahayd 9ka Jannaayo 1987, kuna saabsan Gaadiidka dhulka ee Labada Dal.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya awood sharci ah.

QODOBKA3AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda
Muqdisho, 17.7.1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamad Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 33 ee 21.7.87
Gunno Maaliyeed Shaqaalaha Madaxtooyada JDS

MADAXWEYNAHA J.D.S,

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS Qodobka 82aad.
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 2 ee 5.1.1976 kuna saabsanaa mideynta iyo habeynta Gunnooyinka.
ISAGOO AQOONSADEY: In ay tahay lagama maarmaan in la dhiiri-geliyo shaqaalaha Laamaha Madaxtooyada qaarkood iyadoo kor loo qaadayo dhaqaalahooda.
ISAGOO DHAGEYSTEY: Talada Wasiirka 1aad ee Dowladda JDS.

WUXUU XEERIYEY

QODOBKA 1AAD

Laga bilaabo 1.6.1987, waxaa Shaqaalaha Laamaha kale ee Madaxtooyada JDS loo ogolaaday «Gunno maaliyadeed» lacagteedu tahay farqiga shaqaalaha la midka ah sida Hantidhawrka iyo Garyaqaanka Guud ee Dawladda ay dheer yihiin.

QODOBKA 2AAD

Gunnooyinkan waxay la mid yihiin lacagtii hore loogu ogolaaday Xeerka Madaxweynaha JDS Lr. XGSW/9/92 ee 11.9.1983 iyo faah-faahinta Wasaaradda Maaliyadda Lr. AG/X/7.04981 ee 19. Nov. 1983

QODOBKA 3AAD

Gunno-Maaliyadeedka Xeerkan jideynayo waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Wasaaradda Maaliyadda.

QODOBKA 4AAD

Xeerkan, wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinnay.
Diiwaanka L. 6 Bog. L. 38.
Muqdisho, 25.7.1987.
Hantidhowraha Guud.
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

WASIIRKA 1AAD EE DAWLADDA JDS
Maxamed Cali Samatar.

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA MAALIYADDA
(MAXAMED SHEEKH CISMAAN)

## GUNNO MAALIYADEED

| XIL | | GURI | | TOTAL | TIRO | | ISUGEYN | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| A/2 | Agaasime Guud | 2.400/= | + | 1.400/= | 3.800/= | X 2 qof | = 7.600/= | X 12bil | = 91.200/= |
| A/3,4,5 | Agaasime Waax | 1.600/= | + | 1.200/= | 2.800/= | X 13 qof | = 36.400/= | X 12bil | = 436.800/= |
| A/6,8,B/7 | Darajada | 1.200/= | + | 800/= | 2.000/= | X 15 qof | = 30.000/= | X 12bil | = 360.000/= |
| B/8,9 | Darajada | 1.000/= | + | 600/= | 1.600/= | X 28 qof | = 44.800/= | X 12bil | = 537.600/= |
| Shaqaalaha Hoose | | 300/= | + | 450/= | 750/= | X106 qof | = 79.500/= | X 12bil | = 954.000/= |

ISUGEYN GUUD 2,379.6000.00

FIIRO GAAR AH: Shaqaalaha kale ee aan gaarsiis neyn jagooyinka iyo Darajada lagu muteysanaya Gunno maaliyeedka waxay xaq u yeelanayaan 300/= darajooyinka B/10 iyo C waxay xaq u leeyihiin saaca do dheeri ah 15/= maalintii oo ah bishiiba 15 beri, darajada D waa Sh. So. 10/=

MUSHAAR 4 BILOOD

| | | MUSHAHAR | TIRO„ | ISUGEYN | 4 BILOOD | ISUGEYN |
|---|---|---|---|---|---|---|
| A/2 | Agaasime Guud | 1,960/= | X 2 qof | X 3,920/= | X 4 bilood = | 15,680/= |
| A/3,4,5 | Agaasime Waax | 1,680/= | X 13 qof | X 21,840/= | X 4 bilood = | 87,360/= |
| A/6,8 B/7 | Sarkaal | 1,400/= | X 15 qof | X 21,000/= | X 4 bilood = | 84,000/= |
| B/3,B/9,C/8;C/9 | Sarkaal Fuliye | 1,240/= | X 85 qof | X 105,400/= | X 4 bilood = | 421,600/= |
| B/10, C/10 | Fuliye | 742/50 | X 32 qof | X 23.760/= | X 4 bilood = | 95,040/= |
| Shaqaale Hoose | | 595/= | X 17 qof | X 10,115/= | X 4 bilood = | 40,460/= |

FIIRO GAAR AH: Waa Mushaarka Dheeriga ah ee bilaha Maarso, Juun, Setembar iyo Disembar

ISUGEYN GUUD SH. SO 744,140

## GUNNADA SOCDAALKA

| | | |
|---|---|---|
| Agaasime Guud | Sh. So 2,400/= | Markiiba |
| Agaa. Waax, madax qeyb; xubin | sh. so. 1,800/= | Markiiba |
| Dhammaan darajada B, C | Sh. So. 1,500/= | Markiiba |
| Dhammaan Darajada D | Sh. So. 900/= | Markiiba |

## GUNNADA BEDDELKA

| | | |
|---|---|---|
| Agaasime Guud | Sh. So. 120/= | 450/= |
| Ku Xigeen | Sh. So. 100/= | 400/= |
| Ag. Waax, Madax qayb xubin | sh. so. 80/= | 350/= |
| dhammaan darajada B, C | Sh. So. 70/= | 300/= |
| Dhammaan darajada D | Sh. So. 50/= | 230/= |

**XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA**
**Lr. 11 ee 27 Abriil 1987**

**AQOONSI URURKA SAMAFALKA HORN OF AFRICA RELIEF AND DEVELOPMENT FOUNDATION**

WASIIRKA ARRIMAHA GGUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS
ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.1984 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.1973;
ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay abuurista Ururada noocan ah.

WUXUU GUDDOONSHAY
QODOBKA 1AAD

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka HORN OF AFRICA RELIEF AND DEVELOPMENT FOUNDATION oo ah Urur Samafal, ujeedadiisuna tahay horumarinta mashaariicda la xiriira horumarinta miyiga iyo magaalooyinka xagga dhaqaalaha iyo bulshada, waxbaridda iyo tababaridda dadka liito oo deggan miyi iyo magaalo.

QODOBKA 2AAD

Ururkku wuxuu saldhigiisu noqonayaa Muqdisho, wuxuuna laamo ku yeelanayaa dalka gudihiisa iyo dibeddiisa.

QODOBKA 3AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
Muqdisho, 27. 4. 1987

(S.Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla)
WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

## NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xaaji Saciid Diiriye uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dowladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 15.1.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dowladeed oo ku yaal Muqdisho, Dgemada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Retangol Addimihiisuna yihiin 10X40 kuna fadhiya mq. 400.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga:- Dhul dad

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

GaGibeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhulkiisi hore.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Feb. 1987

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Aadan Xaashi Nuur)

L. 199/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qortay Jaalle Caasha Jaa mac Cigaal

HADDUU TIXGELIYEY: In uu ka lumay Jeeg Wareeg Lam. 0048834 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 kuna qoran Magaca Jaalle Cambaro Wardheere Cigaal sida ku cad Warqadd Lam. 0620 ee Taariikh. 18.7.1987 .ka soo bax day Bangiga Ganacsiga iyd keydka Soomaaliyeed. Laanta HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareeg Lam. 0048834 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 kuna qoran magaca Jaalle Cambaro War dheere Cigaal

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laantaa 3aad in ay siiso Jaaile Caasha Jaamac Cigaal lacagta cad dadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah beddelkii Jeeg War. keyd kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen (15) maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dj moqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 18. 7. 1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANNDIR
(DR. CABDULLAAHI AHMED XAASHI)

L. 220

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Caasha Jaamac Cigaal

HADDUU TIXGELIYEY: In uu ka lumay Jeeg Wareeg Lamb. 00488838 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 ku
Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaalijyeed Laantaa
Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaalijyeed Laantaa
Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaalijyeed Laantaa
na qoran Magaca Jaalle Cambaro Wardheere Cigaal sida ku ca dwrarqadda Lamb. 0620'ee Taar. 18.7.1987 ka soo bax day Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaalijyeed Laanta Saddexaad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. War. Lr. 00488838 lagana someeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed Laanta 3aad. kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 kuna qoran magaca Jaalle Cambaro Wardheere Cigale

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaalijyeed Laantaa 3aad in ay siiso Jaalle Caasha Jaamac Cigale lacagta ca dadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah beddelkii Jeeg Wareegga

keydka kor ku xusan.
Markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen (15) maal mood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soo maaliya, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.
Muqdisho 18. 7. 1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANNDIR
(DR. CABDULLAAHI AHMED XAASHI)

LR. 221

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Maymuuna Xersi Warsame

HADDUU TIXGELIYEY: In uu ka lumay Buug Keydka Lamb. 2878 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 11.900 kuna qoran Magaca Jaalle Maynuun Xersi Warsame sida ku cad warqadda Lam. 002104 ee taariikh. 5.7.1987 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed laanta xarunta
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Keydka L. 2878 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh. So. 11.900 kuna qoran magaca Jaalle Maymuuna Xersi Warsame

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laantaa Xarunta in ay siiso Jaalle Maymuuna Xersi Warsame lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 11.900/= oo ah beddelkii buug keyd kor ku xusan. Markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.
Muqdisho 6. 7. 1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANNDIR
(DR. CABDULLAAHI AHMED XAASHI)

LR. 222

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Isgow Cabdulaahi Maxamed

HADDUU TIXGELIYEY: In uu ka lumay Jeeg Wareeg Lam 0461529 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000, kuna qoran magaca Jaalle Xasan Maxamed Faarax sida ku cad warqadda Lamb. 13843 ee Taariikhdeedu tahay 8.7.1987 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareegga Lr. 0461529 bagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000 kuna qoran magaca Jaalle Xasan Maxamed Faarax

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso Jaalle Isgoow Cabdulaahi Maxamed lacagta keyd kor ku xusan.

cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah beddelka Jeeg Wareega Markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn (15) Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa wax is hortaag ah aan ka imaan ama la keenin.

Muqdisho 11. 7. 1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANNDIR

(DR. CABDULLAAHI AHMED XAASHI)

LR. 223

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Jaalle Faadumo Xuseen Faarax

HADDUU TIXGELIYEY: In uu ka lumay Buug Keydka Lamb. 9930 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 42.501.46 kuna qoran Magaca Jaalle Faadumo Xuseen Faarax sida ku cad warqadda Lam. 0613 ee taariikhdeeduna tahay 14.7.1987 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

caddadeedu tahay Sh. So. 42.501.46 oo ah beddelkii Buug 9930 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laan 3aad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 42.501.46 kuna qoran Magaca Jaalle Faadumo Xuseen Faarax

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laantaa 3aad in ay siiso Jaalle Faadumo Xuseen Faarax lacagta caddadeedu tahay Sh. So. 42.501.46 oo ah beddelkii buug keyd kor ku xusan, markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen (15) maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco faafinaa rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 14. 7. 1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANNDIR
(DR. CABDULLAAHI AHMED XAASHI)

L. 224

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADDU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xuseen Faarax Samatar.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu ka lumay Jeeg Wareeg Lr. 0060104 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran Magaca Jaalle Yuusuf Macalin Xasan sida ku cad war-qadda Lamu. yahay 592 ee Taariikhdeedu 25. 7. 1987 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg/Buug Keyd Lr. 0060104 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 kuna qoran Magaca Jaalle Yuusuf Macalin Xasan

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Afraad in ay siiso Jaalle Yuusuf Macalin Xasan lacagta cad.

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareegga Lam. keyd kor ku xusan.

Markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn (15) maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa wax is hortaag ah aan ka imaan ama la keenin.

Muqdisho 25. 7. 1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANNDIR

(DR. CABDI SALAAD SHANGOLE)

LR. 225

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADDUU ARKAQ Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Macalin Cabdiraxmaan

HADDUU TIXGELIYEY: In uu ka lumay Jeeg Wareeg Lam. 0779299 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 200.000 kuna qoran Magaca Jaalle Cabdulqaadir Macalin Cabdiraxmaan sida ku cad warqadda Lam. 305 ee taariikhdeedu 22. 7. 81 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareegga Lam. 0779299 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 200.000 kuna qoran Magaca Jaalle Cabdulqaadir Macalin Cabdiraxmaan

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad in ay siiso Jaalle Cabdulqaadir Macalin Cabdiraxmaan lacagta caddadeedu tahay Sh. So. 200.000 oo ah bedelkii Jeeg Wareegga kor ku xusan.

Markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn (15) maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa wax is hortaag ah aan ka imaan ama la keenin.

Muqdisho 25. 7. 1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANADIR
(DR. CABDI SALAAD SHANGOLE)

I.R. 226

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANAADIR

HADUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdirax maan Khaliif Ciise

HADDU UTIXGELIYEY: in uu lumay Jeegga Wareega Lam. 0344074 kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Cabdicasiis Xaaji Maxamuud sida ku cad Warqadda Lam. ——— ee Taariikhdeedu tahay 27.7.1987 ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Keyd ka Soomaaliyeed Laanta Qaybta X.Guud.

HADDUU ARKAY: Qod, 69 sharciga L. 2 ee taariikh 9.9.62

WUXUU XEERIYAY

In la baabiyo (Ammortamento) J. War. Lam. 0844074. laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed Laanta Qeybta X. Guud kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran Magaca Jaalle Cabdicasiis Xaaji Maxamuud

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Garawe in ay siiso Jaalle Cabdiraxmaan Khaliif Ciise lacagta caddadeedu tahay Sh. So. 100.000 oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan.

Markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen (15) maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho 27.7.1987

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/BANNDIR
(DR. CABDI SALAAD SHANGOLE)

LR. 227

L. 204

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay J.le Maryan Maxamed Muunye;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga Lam. hoos ku qoran yihiin kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 500.000/= kuna qoran magaca J.le Sheekh Cusmaan X. Maxamed;

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1) | J/Wareega No. | 0749200 | Sh.So. | 100.000/= |
| 2) | » » | 0749201 | » | 100.000/= |
| 3) | » » | 0749284 | » | 100.000/= |
| 4) | » » | 0424774 | » | 100.000/= |
| 5) | » » | 0749136 | » | 100.000/= |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci lam. 2 ee 9.9.1962dii.

WUUXUU XEEREEYEY

In baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. kor ku tilmaaman yihiin lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 500.000/= kuna qoran magaca J.le Sheekh Cusmaan X. Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Marka in ay siiso J.le Maryan Maxamed Muunye lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000/= oo ah beddelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.7.1987

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 228

MAXKAMADDA G.W/GALBEED HARGEYSA

MGH/11/87 Hargeysa 20.6.87

UJ:- Degreeto cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 0449878 ee 2..1.37 Sh.So. 50.000/= kuna qornaa Ismaaciil Cabdi Maygaag taariikhdiisu tahay la faafiyey 18.6.87 laga sameeyey B.G.&Keydka Laanta Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdi Koosaar Cali ee 24.6.87 ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeeggaa Wareega ee lumay ee kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Keyd ka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna taariikhaysan 18.6.87 ee uu Bangigu Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u kala diray;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ee lambar yahay 000566 kuna taariikheysan 25.6.87 ee uu Bangigu ku soo muujiyey in uu Jeeggaasi Wareega ee lumay leeyahay astaamaha kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: In Jeeggaasi Wareega ee lumay uu lacagtiisa iska leeyahay ninka la yiraahdo Cabdi Koosaar Cali;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69.70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeeggaasi Wareega ee lumay ee ujeedada ku xusan loona cusboonaysiiyo Cabdi Koosaar Cali, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ay cabasho uga soo qortaan haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa

(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

L. 229

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA

MGH/10/87 Taariikhda 22.7.1987

UJEEDDO: DIGIREETO CUSBOONAYSIIN LABA JEEG WAREEGE OO KALA AH 0340405 ee 30.11.1933 sh. so. [illegible] kuna qoran Cabdi Ducaale Jaamac

Jeegga wareega ee No. 0342229 ee 3.2.1987 ee Sh. So. 50.000 ku qoran Maxamed Axmed Cumar Isbaddaba lage sameeyey Laanta Koowaad Hargeysa

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W. Galbeed ee Hargeysa;

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Xasan Axmed Jaamac uuna ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo labada Jeeg wareega ee lumay ee Lambar kor ku qoran yahay.

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu laamihiisa iyo xisaabaha Guud u kala diray ee ku taariikhaysan 2. 5. 1987

MARKUU ARKAY: Xaashidda cadaynta ah ee ka soo bax day Bangiga Ganacsiga kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa, ee Lambarkeedu yahay 00638 ee ku taariikhaysan 21.7.1987 ayna ku soo cadeeyeen in Jeegagaasi ay leeyihiin astaamaha sare ku qoran.

MARKUU ARKAY: In Jeegagaasi wareega ee lumay in uu lacagtooda iska leeyahay Xasan Axmed Jaamac.

MARKUU ARKAY: Qodobbadda 69 — 70 ee Xeerka lam. 2 ee soo baxay 9. 9.1965

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal garceyo Jeeggaga wareega ee lumay ee sare ku qoran loona cusboonaysiiyo Xasan Axmed Jaamac, cus boonaysiintana Gacanta laga saaro isaga ama ciddii Awood ku haysata Muddo 15 maalmood gudahood ah.

Waxaa la farayaa maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa in uu nuqulka Go'aankan ku dhe iyo Bangiga Iridihiisa si cidii haysata Jeeggagaasi wareega ee lumay ee kor lagu kansar gaeeyay ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GAL. HARGEYSA
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

L. 230

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA
MCG/11/87 HARGEYSA 20.6.1987

UJEEDDO: DIGIREETO CUSBOONAYSIIN JEEGGA WA

REEGGA EE LUMAY EE LAM. YAHAY 0012281 ee lacagtu tahay 200,000 ee la sameeyey 14.6.1987 lagana sameeyey Baanka Laanta labaad loona sameeyey Cali Jaamac Warsame

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W.Galbeed ee Hargeysa.

MARKUU ARKAY. Arjiga uu soo qortay Maxamed Xaaji Jibriil Yuusuf ee uu ku codsanaayo in loo cus boonaysiiyo Jeega Wareega ee lumay ee kor ku xusan.
MARKUU ARKAY: Taarka uu Bangigu Laamihiisa u kala diray iyo Xisaabaha Guud ee ku taariikhaysan 17.6.1987.
MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Keyd ka Laanta Labaad ee Hargeysa ee uu Bangigu ku tilmaa maayo in uu Jeegaasi wareega ee lumay uu leeyahay Astaa maha ujeedada sare ku xusan. Xaashidaasi oo Lambarkeedu yahay 278 oo ku taariikhaysan 07/07/87.
MARKUU ARKAY: In Jeegaasi Wareega ee Lumay uu iska leeyahay Lacagtiisa ninka la yiraahdo Maxamed Xaaji Jibriil Yuusuf.
MARKUU ARKAY: Qodobbadda 69 — 70 ee Xeerka lam. 2 ee soo baxay 9.9.1965

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegaasi wareega ee lumay ee ujeedada ku xusan loona cusboonaysiiyo Maxamed Xaaji Jibriil Yuusuf, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood Gudahood ah.

Waxaa la farayaa maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo keydka laanta Hargeysa in uu nuqulku go'aankan ku dhejiyo Bangiga Iridihiisa si ciddii haysata Jeegaasi wareega ee lumay ee kor lagu kasal gareeyey ay cabasho uga soo qortaan haddii ay doonaan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. W/GAL. HARGEYSA
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)